


# Qiimeynta Kindhada ee Bilowga ugu wanaagsan

## Tusaha xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

**Qiimeynta Kindhada ee Bilowga ugu Wanaagsan waa qiimeynta gobolka oo dhan ee caawineysa macalimiinta inay gartaan xirfadaha far iyo tiro barashada Ingiriiska ee arday kasta bilowga Kindhada.**



Carruurut waxay ku bilaabaan dug-siga iyagoo hore u leh xirfadaha tiro iyo far barashada, aqoonta iyo fahamka ay ku yeeshen ku xirnaanta aduunka iyo dadka ku hareeraysan iyaga. Qiimeynta Kindhada ee Bilowga ugu Wanaagsan waxaa ku jira qaybta far iyo tiro barashada waxayna si-ineysaa macalimiinta macluumaad ku saabsan baarida iyo wuxuu ar-daygu ku xoogan yahay iyo baahida shakhsi ahaaneed.

Qiimeyntu waxay taageeraysaa macalimiintu inay sameeyaan bar-naamijyada waxbarashada iyo bari-da ee wax ku sii dhisaya waxa ar-daydu ay haddaba yaqaanaan. Macalimiintu waxay si gaar ah ula fadhiistaan arday kasta, iyagoo xo-ogga saaraya waxay sameyn karaan. Ilmahaagu uma baahna in-uu isu soo diyaariyo ama wax u soo barto qiimeynta. Maadaama carruu-tu ay wax ku bartaan heerar kale duwan uma baahnid inaad saluugto haddii ilmaagu uusan ka jawaabi karin su'aalaha oo dhan.

Waxyar ka dib qiimeynta, macalimi-inta waxay ku siin doonaan maclu-umaad ku saabsan xirfadaha, aqoonta iyo fahamka ilmahaaga ee ay muujiyey intii u uku jiray qiime-ynta.

Qiimeynta Kindhada Bilowga Wanaagsan waxaa ku jira dhammaan ardayda. Haddii uusan Ingiriisku ahayn luuqadaada guriga ama ilmahaagu u baahan yahay wax loo hagaajiyo, dugsigaaga kala xiriir wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii ilmahaaga loo taageeri lahaa.

### Qiimeynta far barashada

Hawlahaa far barashada waxaa loo sameeyey in lagu ogaado in arday-du qori karaan magacooda, garan karaan jabaqda/sanqarta, xarfaaha iyo erayada la yaqaan, iyo inay xasuusan karaan faahfaahinta ku saabsan buug gaaban oo loo akhriyey iyaga.

Inta lagu jiro qiimeynta far barasha-da macalinku wuxuu weydiin doonaa ilmahaaga su'aalo sida:

- 'Dhageyo erayadaan: map, tap. Ma ka fekeri kartaa eray kale oo ay isku dhawaaq yihiin?'
- '(ka dib markaad arkhrisid buug gaaban) 'Ma ii sheegi kartaa wax ku saabsan sheekadaan hadda kuu akhriyey adiga?'

Su'aalahan waxay ka caawinayaan macalimiinta inay go'aamiyaan haddii ilmahaagu uu garan karo er-ayada isku sida u dhawaaqa iyo in-uu xasuusto macluumaadka buug gaaban oo loo akhriyey iyaga. Ku-wani waa xirfado far barasho oo muhiim ah oo ay carruurtu yeeshaan sannadkooda koowaad ee dugsiga.

### Qiimeynta tiro barashada

Hawlahaa tiro barashada waxay la xiriiraan fikradaha lambarka ee hore waxaana loogu talagalay inay gartaan sida ugu wanaagsan ee ar-daygu uu wax u akhrin karo, lamba-radee ayey garan karaan, haddii ay tirin karaan alaabta, isku dari karaan ama kala goyn karaan lambarada yar yar; iyo inay gartaan qaababka soo noqnoqonaya.

Inta lagu jiro qiimeynta tiro barasha-da macalinku wuxuu weydiin doonaa ilmahaaga su'aalo sida:

- 'bilow tirinta kow waxaana kuu sheegi doonaa markaad joojineydis'
- 'ma ii sheegi kartaa lambarka wuxuu yahay?' (5)

Su'aalahan waxay ka caawin doonaan macalimiinta inay go'aamiyaan haddii ilmahaagu uu garan karo lambarada oo uu tirin ka-ro laga bilaabo kow iyo wixii ka danbeeya. Kuwani waa xirfado tiro barasho oo muhiim ah oo ay car-ruurtu yeelan doonaan sannad-kooda ugu horeeya dugsiga.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Qiimeynta Kindhada ee Bilowga ugu Wanaagsan, la xiriir dugsiga ilmahaaga.**

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, kala xiriir Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450. Waxay kuu balamin karaan turjumaan luuqadaada ah si uu kaaga caawiyo la hadalka dugsiga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.